



1B

Macluumaad caafimaad ku qoran luqado ama nuskhado kale

Macluumaad loogu talagalay dadka qaba ama uu saameeyay cudurka waxyeellada murqaha iyo neerfaha ama Cudurka Kennedy

Haddii Ingiriisigu uusan ahayn luqadaada koowaad ama aad dhibaato ka qabtid dhanka aragga, waxaa laga yaabaa inay adag tahay inaad hesho macluumaad ku saabsan cudurka waxyeellada murqaha iyo neerfaha ama cudurka Kennedy iyo nooca taageero ee la heli karo.

Xaashidan warbixineed waxay sharraxaysaa sida macluumaad sax ah lagu helo adigoo isticmaalaya luqadaha kale ama nuskhado kale, sida farta Braille ee dadka indhaha la', far waawayn ama cajalad dhegeysi ah. Xaashidan hadda waxaa lagu heli karaa luqado kala duwan.

Waxaana ku qoran waxyaabahaan soo socda:

- 1: Sidee ku heli karaa macluumaad ku qoran luqadaha kale?
- 2: Miyaan macluumaad ku heli karaa farta Braille, far waawayn ama nuskhado kale?
- 3: Maxaa kale oo i caawin kara?
- 4: Sidee ayuu ururka MND ii taageeri karaa mustaqbalka?
- 5: Sidee ku helaa warar dheeraad ah?



Calaamaddan waxaa loo isticmaalaa in lagu tilmaamo **daabacadaheena kale**. Si aad u ogaato qaabka lagu heli karo, ka eeg *Macluumaad dheeraad ah* ee ku qoran dhammaadka xaashidan.



Calaamaddan waxaa loo isticmaalaa in lagu tilmaamo **xigashada** dadka kale ee qaba ama uu saameeyey MND.



Ururka MND waxaa loo aqoonsaday inuu yahay soo saare lagu kalsoon yahay ee macluumaadka daryeelka caafimaadka iyo bulshada.

www.england.nhs.uk/tis

Had iyo jeer weydii kooxdaada daryeelka caafimaadka iyobulshada wixii talo ah markaad go'aan ka gaareyso daaweynta iyo daryeelka. Waxay kuu diyaarin karaan turjumaan kaa caawiya ballamada.

Fadlan ogsoonow in kani uu yahay nooc la turjumay ee macluumaadka rasmiga ah. Ururka MND wuxuu adeegsadaa adeegyo turjumaan oo aqoon leh, hase-yeeshee mas'uul kama noqon doonno khalad kasta oo ku jirta turjumaanta. In la turjumo wixii macluumaad dheeraad ah ayaa suurta gal ah, laakiin kani waa adeeg xaddidan. Wixii faah-faahin ah la xiriir khadka caawinta MND Connect:

Telefoonka: **0808 802 6262**

Email: [**mndconnect@mndassociation.org**](mailto:mndconnect@mndassociation.org)

1: Sidee ku heli karaa macluumaad ku qoran luqadaha kale?

Ka socota Ururka MND

La xiriir khadkeena caawinta MND Connect haddii aad u baahan tahay inaan kugu caawino luqadda aad dooratay.

Waxaa laga yaabaa inaad marka hore u baahatid qof ku hadla af Ingiriis, si ay kooxda khadka caawinta u fahmaan waxaad u baahan tahay. Si kastaba ha noqotee, markaas waxay awoodi doonaan inay dib ku soo wacaan ayagoo isticmaalaayo turjubaan, kaasoo kuu tarjumi kara.

MND Connect

Telefoonka: 0808 802 6262

Email: mndconnect@mndassociation.org

Waxaan khayraadkeena ku saabsan *Soo Bandhigga cudurka waxyeellada murqaha iyo neerfaha* ku bixinnaa luqado kala duwan. Qoraalkan guud ee cudurka wuxuu ka kooban yahay macluumaad ku saabsan noocyada taageerada ee laga heli karo England, Wales iyo Waqooyiga Ayrland.

Haddii aad qabto cudurka Kennedy oo aad xaashida warbixinta 2B - *cudurka Kennedy* ugu baahan tahay luqad kale, la xiriir MND Connect si aad u hesho caawimaad.

Isla sidaas oo kale xaashidaan waxaan xittaa luqado kale kugu siin karnaa xaashiyada warbixineed ee hoose:

- 7A - *Dhibaatooyinka liqitaanka*
- 7B - *Ku quudinta tuubbo*
- 8A - *Taageerida dhibaatooyinka neefsashada*
- 8B - *Hawo-qaadashada cudurka waxyeellada murqaha iyo neerfaha (MND)*

Ka soo dejiso faafisyada la tarjumay www.mndassociation.org/languages ama ayagoo daabacan ka soo codso MND Connect. Fadlan ogsoonow, waxaan isticmaalnaa shirkadaha adeegyada turjumaanka ee xurmado leh, hase-yeeshee mas'uul kama noqon doonno wixii khalad ee ku jira turjumaanta.

U sheeg MND Connect haddii aad waxyaabaha kor ku qoran ugu baahatid luqad kale oo ka duwan kuwa aan hore u bixinney. Waxaan sidoo kale awoodi karnaa in aan turjumno xashiyaal warbixineed kale, ama qeyb ka mid ah hagaha weyn, si lagugu caawiyo gaarida go'aan muhiim ah oo ku saabsan daaweynta ama daryeelka.



"Macluumaadkaaga ayaa iga caawiyay la hadalka, iyo weliba la doodka taakhaatiirta iyo kaaliyayaasha markii aan kala hadlaayey daaweynta."

Ballamada caafimaadka iyo daryeelka bulshada

Markaad go'aan ka gaareysid daaweynta iyo daryeelka, waxaa muhiim ah inaad xulashoyinkaada kala hadasho xirfadlayaasha caafimaadka iyo daryeelka bulshada ee ku caawiya. Tani way adkaan kartaa haddii aysan ku hadlin luuqadaada. Si kastaba ha noqotee, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka waa inay sameeyaan is-beddel macquul ah si ay dadka uga caawiyaan inay fahmaan wada hadaladaan.

Waxay awoodi karaan inay kuu qaban-qaabiyaan turjumaan kaa caawiya ballamada, gaar ahaan ballamada caafimaadka. Rugaha GP-yada iyo isbitaallada badankood waxay caadi ahaan baxshaan adeegyo turjubaan, laakiin kuwo kale waxay bixiyaan adeegyada turjumaanka kaliya marka laga codsado.

Haddii aad dareensan tahay in takhtarkaaga uusan mar walba fahmin dhibaatooyinkaaga sababo luqadeed awgeeda, weydii GP-gaaga inuu kuu qaban-qaabiyo turjumaan yimaada ballankaaga. Waxaad u baahan doontaa inaad kani sameyso ballankaaga ka hor, si horey loogu qaban-qaabiyo. U sheeg haddii uu muhiim ku yahay in turjubaanka ahaado lab ama dheddig.

Inkastoo uu waajibaad sharciyeed ku yahay adeegga caafimaadka inay kuu helaan turjubaan tababaran, waxaad doorbidi kartaa inuu kuu turjumo xubin qoyskaaga ka mid ah. Rabitaankaaga waa la ixtiraami doonaa. Haddii GP-gaaga ama isbitaalka uu bixiyo macluumaad qoraal ah, waxaad xittaa kani ku codsan kartaa luqaddaada koowaad.

Haddii aad qeyb ka tahay qiimeyn daryeel bulsho ee laga sameeynaayo England ama Wales, weydii dawladdaada hoose inay turjumaan ku heelaan. Haddii ay tahay waqooyiga Ayrland weydii guddiga caafimaadka iyo daryeelka bulshada deegaankaaga. Xaaladaha badankood waxay isku dayi doonaan inay kuu qaban-qaabiyaan, si ay u xaqiijiyaan in qiimeyntaada ay tahay mid si caddaalad ah loo sameeyay oo ay buuxiso baahidaada.

Haddii aad ku nooshahay Skotland, waxaad la xiriiri kartaa MND Scotland si aad u hesho talo dheeraad ah.

Ka eeg *Macluumaad dheeraad ah* ee ku qoran dhammaadka xaashidan si aad u hesho faah-faahinta xiriirka.

Bogaga internetka iyo ururada kale

Waxaa mar mar caawinaad leh in la isticmaalo tarjumaadda otomaatikada ah ee bogga internetka, laakiin waxaa lagaa yaabaa inuusan sax eheen oo uu warar khalad ah soo saaro. Si kastaba ha noqotee, ururada qaarkood waxay macluumaadka ku baxshaan luuqado kala duwan. Ka eeg boggooda internetka ama weydii qof inuu kula xiriiro ururka.

2: Miyaan macluumaad ku heli karaa farta Braille, far waawayn ama nuskhado kale?

Ka socota Ururka MND

La xiriir khadkeena caawinta, MND Connect, si ay kugula taliyaan macluumaadkeena iyo qaababka la heli karo.

Telefoonka: 0808 802 6262

Email: mndconnect@mndassociation.org

Waxay kaa caawin karaan helitaanka waxyaabaha soo socda:

Farta Braille:

Sida iloyinkeena tarjuman, waxaad farta Braille ee dadka indhaha la' ku codsan kartaa nuqullada xaashiyada warbixineed ama qaybo ka mid ah hageyaasha. Fadlan ogow, waxaan isticmaalnaa shirkadaha adeegyada farta Braille oo xurmado leh, hase-yeeshee mas'uul kama noqon doonno wixii khalad ah oo ku jira wixii ay soo saaraan.

Far waawayn:

Marka laga reebo kaararkeena yaryar iyo buug-yarayaasha yaryar, dhammaan macluumaadkeena wuxuu ku qoran yahay far cabbirkiisa yahay 12pt, waxaana laga heli karaa internetka halkaaso oo aad ku sii kordhin kartid cabbirka muuqaalka.

Waxyaabahaan soo socda waxaa lagu soo saaraa far waawayn (16pt ama ka sare):

- *Soo bandhigga cudurka waxyeellada murqaha iyo neerfaha (MND)*
- *Hage si fudud loo akhrin karo ee ku saabsan cudurka waxyeellada murqaha iyo neerfaha (MND)*

Cajalad dhegeysi ah:

Soo bandhigga cudurka waxyeellada murqaha iyo neerfaha (MND) waxaa lagu heli karaa af Ingiriis ku duuban cajalad dhegeysi. Waxaad ka heli kartaa barta internetka Soundcloud, halkaan ka gal:

<https://soundcloud.com/mndassoc/mnd-audiobook>

Duubid dheeraad ah ee iloyinkeena waxaa la samayn doonaa sannadka 2019.

Nuskhado elektaroonik ah:

Waxaan soo bandhigi doonnaa nuskhad elektaroonik ah sanadka 2019, kaasoo aad ku heli karto xaashiyadeena warbixineed iyo ilooyinka kale. Nuskhaddaan si fudud ayaad uga akhrisan kartaa telefoonada gacanta ee nooca aaqilka ah, kumbuyuutarada laptop iyo tablet, oo markaad kordhiso cabbirka qoraalka, socodka qoraalka oo dhan ayaa si toos ah isku beddelaayo si uu u buuxiyo bogga.

Ballamada caafimaadka iyo daryeelka bulshada

Macluumaadka ay soo saareen GP-yada, adeegyada caafimaadka ama goobaha qiimeynta daryeelka bulshada ayaa sidoo kale lagu heli karaa farta Braille, far waawayn ama nuskhado kale.

Soo sharax baahidaada haddii aad leedahay nooc naafonimo ah oo dhibaato kaaga dhigta akhriska iyo isticmaalka macluumaadka. Xaaladdan, adeegyada daryeelka caafimaadka iyo daryeelka bulshada badanaaba waxawaajibbaad ka saaran daryeel si loo xaqiijiyo inaad heli kartid oo aad fahmi kartid macluumaadka go'aan-gaarista oo ay bixiyaan.

Ilooyinka soo socda waxay af Ingiriis kugu siinayaan faah-faahin ku saabsan sida waajibaadka daryeelkan loo maamulo:

England

Eeg *Heerka Macluumaadka ee la heli karo:*
www.england.nhs.uk/ourwork/accessibleinfo

Wales

Eeg *dhamaan Heerarka Wales ee loogu talagalay is-gaarsiinta iyo macluumaadka dadka qaba luminta dareenka.* Kani waxaa lagu heli karaa af Ingiriisi iyo Welsh labaduuba:
gov.wales/topics/health/publications/health/guidance/standards/?lang=en

Waqooyiga Ayrland

Eeg *Sameynta is-gaarsiin ay dhammaan heli karaan - Hage loogu talagalay shaqaalaha Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada (HSC):*
www.belfasttrust.hscni.net/pdf/making_communication_accessible_to_all.pdf

3: Maxaa kale oo i caawin kara?

Qiimeynta Hadalka iyo is-gaarsiinta

MND wuxuu saameeyn ku yeelan karaa hadalka iyo is-gaarsiinta, kaasoo dhibaato ka dhigaysaa hadalka ama isticmaalka dhaq-dhaqaaqyada jirka iyo muujinta wajiga. Cudurka Kennedy wuxuu xittaa saamayn ku yeelan karaa habka aad u hadlaysid.

Haddii aad bilowdo inaad dhibaato kala kulanto, weydii takhtarkaaga inuu kuu gudbiyo daaweeyaha luqadda iyo hadalka si lagu qiimeeyo. Waxay kugula talin karaan qalabka daaweynta iyo qalabka is-gaarsiinta, kuwaas oo laga yaabo in lagaaga soo bilaawo aalado fudud sida sawiro iyo alwaax wax ku qoran, ilaa ay gaarto caawinaad faah-faahsan ee ah isticmaalka barnaamijka kombiyuutarka.

Waxa kale oo aad rabi kartaa inaad raadsato higid ku saabsan keydinta codka iyo keydinta fariimaha, si aad u isticmaasho codkaaga markaad hadlayso ayadoo loo maraayo aaladaha kombiyuutarka.



Faah-faahin dheeraad ah oo ku saabsan hadalka iyo is-gaarsiinta MND, ka eeg:

- Qeybta 8: *hadalka iyo is-gaarsiinta*, ka socdo *hagaheena ku saabsan la noolaanshaha cudurka waxyeellada murqaha iyo neerfaha*
- Xaashida macluumaadka 7C - *Taageerada hadalka iyo is-gaarsiinta*
- Xaashida macluumaadka 7D - *Keydinta codka*

Bixinta tilmaamo qoraal ah

Haddii hadalka dhibaato ku qabtid ama ku hadli karin af Ingiriis, waxaa laga yaabaa inuu caawinaad kuu yahay in aad dhiibto qoraalo aad horey u diyaarisay oo ku qoran waxyaabaha aad rabtid inaad sheegto si ay dadku u fahmaan baahidaada. Waxaa laga yaabaa inaad jeceshahay inaad qoraaladaan ku diyaariso luqada aad doorbidayso iyo af Ingiriisi si aad u caawiso dhammaan kuwa ku lug leh daryeelkaaga. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad qaraabo, saaxiibo ama turjumaan weydiiso inuu ku caawiyo.

Qoraaladaan waxay noqon karaan kuwo faa'iido leh marka:

- aad tagayso ballamada
- safrayso ama qabanayso hawl maalmeedkaaga caadiga ah
- aad joogto munaasabadaha bulshada.

Labadaan qoraal ayaa laga yaabaa inay waxtar kuu lahaadaan:

Anigu way igu adag tahay inaan hadlo sababtoo ah waxaan qabaa cudurka waxyeellada murqaha iyo neerfaha/cudurka Kennedy. Waxaan sidoo kale ku hadlaa: (halkaan ku qor magaca luqadda aad doorbidayso).

Haddii aadan ku hadli karin luqaddayda oo aad u baahan tahay inaad ila soo xiriirto, daryeelahayga/qaraabada/takhtarka ayaa ku caawin kara. Fadlan la xiriir: (halkaan ku qor faah-faahinta xiriirka).

Halkan ka eeg labada nooc ee qoraaladaan ku qoran af Ingiriis, si loo caawiyo dadka af Ingiriis ku hadla inay fahmaan baahidaada. Hal waxaa loogu talagalay cudurka MND, midka kalana cudurka Kennedy, sida ugu habboon. Meelaha bannaan ku qor magaca luqaddaada iyo faah-faahinta xiriirka. Isticmaal xaashidan ama ku qor buug xasuus-qor:

Midka cudurka waxyeellada murqaha iyo neerfaha:

I find it difficult to communicate because I have motor neurone disease. I also speak Somali.

If you cannot speak my language and need to communicate with me, my carer/relative/doctor can help. Please contact:

Halkaan ku qor faah-faahinta xiriirka:

Cudurka Kennedy:

I find it difficult to communicate because I have Kennedy's disease. I also speak Somali.

If you cannot speak my language and need to communicate with me, my carer/relative/doctor can help. Please contact:

Halkaan ku qor faah-faahinta xiriirka:

Akhris fudud

Daabacyadeena iyo *Hagaha akhriska fudud ee cudurka waxyeellada murqaha iyo neerfaha* ayaa waxtar ku lahaan kara haddii:

- aad rabtid in qoraal fudud ku akhriso af Ingiriis
- aad u baahan tahay wax ku qoran far waawayn iyo jumlado gaaban
- aad qabtid dhibaatooyin waxbarasho ama aad taqaano qof qabo.

Ka xulo *hageyaasha (guides)*: www.mndassociation.org/careinfo si aad u soo dejiso *hagaha akhriska fudud* ama asagoo daabacan ka dalbo khadka caawinta MND (ka eeg dhammaadka xaashida faah-faahinta xiriirka).

4: Sidee ayuu ururka MND ii taageeri karaa mustaqbalka?

Waxaan nahay hay'ad samafal oo ku dadaasha hagaajinta nololaha qof kasta leh ama uu saameeyey cudurka MND ee jooga gudaha England, Wales iyo Waqooyiga Aryland. Waxaan sidoo kale taageernaa dadka leh ama uu saameeyey cudurka Kennedy's, kuwaas oowadaaga calaamadaha cudurka ee isku mid ah.

Waxaan fahamsanahay in dadku leeyihiin dooroshoyin, duruufo iyo caqiidooyin kala duwan, oo saameeya sida aad rabto in daryeelka iyo taageerada loo baxsho. Kooxyadeena adeegga u sheeg haddii aad uu baahan tahay caawimaad gaar ah. Waxaa laga yaabaa aynaan ku hadlin luqaddaada, sidaas darteed waxaad u baahan tahay in qof wakiil kaa ah nala soo xiriiro.

Khadka caawinta ee MND (ka eeg dhammaadka xaashida faah-faahinta xiriirka) ayaa kuu soo bandhigi kara adeegyadeena, sida loo heli karo, oo ay ku jirto:

- ururyada booqdayaasha mutadaawiciinta ah, kuwaasoo ku siin karo macluumaad iyo taageero hab telefoon, email ama guriga kugu soo booqan karo meelaha laga helo.
- laamaha ama kooxaha deegaanka, halkaasoo aad kula kulmi karto dadka kale uu saameeyey MND
- la taliyayaasha horumarinta daryeelka gobolka, kuwaasoo gacan ku leh adeegyada caafimaadka deegaanka iyo daryeelka
- kooxdeena adeegga caawimaada, kuwaasoo laga yaabo inay si deyn ah kuu siiyaan qaar ka mid ah qalabyo, ama kaalmo lacageed, haddii adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulshada bixin karin (xaaladaha badankood, codsiyada waa in la soo mariyo xirfadle daryeel caafimaad, ka dib markii qiimeyn lagu sameeyo baahidaada)
- xarumaha daryeelka caafimaadka MND iyo shabakadaha qayb laga maalgeliyay, oo bixiya caawimo takhasus ah iyo daryeel isku xiran (oo sidoo kaleba la soo mariyo adeegyada neerfaha ee gobolka)
- barteena internetka iyo ilooyinka macluumaadka: www.mndassociation.org
- Shirarka internetka: <http://forum.mndassociation.org> kaasoo bixiya meel amaan ah oo lagu wadaago khibradaha iyo taageerada dadka kale uu MND saameeyay (kani wuxuu ku qoran yahay af Ingiriis, markaa waxaad u baahan

kartaa qof kugu caawiya akhriska ama wax ku qorista madalka)

- xubnimada, kaasoo bilaash u ah dadka qaba MND ama cudurka Kennedy, ama lammaanayaashooda iyo daryeelayaashooda (kani waxaa ka mid ah xuquuqda cod-bixinta Kullankeena Guud ee Sanadka).

5: Sidee ku helaa warar dheeraad ah?

Ururada waxtarka leh

Ma annu ansixinin mid ka mid ah ururrada soo socda, laakiin waxaan ugu soo darney si ay kaaga caawiyaan inaad bilawdo raadinta macluumaad dheeri ah. Haddii aysan ku hadlin luqaddaada, waxaa laga yaabaa inaad qof weydiiso in asagoo wakiil ku ah ayaga la xiriiro:

Faah-faahinta xiriirka waa sax waqtiga la daabacey, laakiin waxaa laga yaabaa inay is-beddelaan inta u dhaxaysa dib u eegida. Haddii aad u baahato caawimaad si aad u hesho urur, la xiriir khadka caawinta ee MND Connect (Ka eeg dhammaadka xaashidan wixii faah-faahin ah).

Advicenow

Macluumaad internet ee ku saabsan xuquuqyada iyo arrimaha sharciga.

Barta internetka: www.advicenow.org.uk

Talo-siinta Muwaadiniinta (Citizens Advice)

Talo bixin bilaash ah, oo qarsoodi ah si lagugu caawiyo xallinta dhibaatooyinka sharciyeed, lacageed iyo dhibaatooyin kale. Ka raadi xafiisyada deegaanka ku dhow bogga internetka.

Telefoonka: 03444 111 444 (England, ama la xiriir Xafiiska deegaankaaga ee Talo-siinta Muwaadiniinta)
0344 477 2020 (Wales)

Barta internetka: www.citizensadvice.org.uk (England)
www.citizensadvice.org.uk/wales (Wales)
www.citizensadvice.org.uk/nireland (Northern Ireland)

Wax ka qabadka Naafada (Disability Action)

Waa hay'ad samafal ee Waqooyiga Ayrland oo u shaqaysa xuquuqda dadka naafada ah.

Telefoonka: 028 9029 7880
Email: hq@disabilityaction.org
Barta internetka: www.disabilityaction.org

Adegga Sharciga ee Dadka Naafada ah (Disability Law Service)

Gargaarka sharciga naafada.

Telefoonka: 020 7791 9800
Email: advice@dls.org.uk
Barta internetka: www.dls.org.uk

GOV.UK

Macluumaadka internetka dawladda ee ku saabsan manaafacyada iyo taageerada England iyo Wales.

Barta internetka: www.gov.uk

NHS Choices

Talo macluumaad caafimaad, la heli karo 24 saac, 365 maalmood sanadkiiba.

Telefoonka: Wac 111 haddii aad si dhakhsi ah ugu baahan tahay talooyin, laakiin aan ahayn talo caafimaad oo deg-deg ah gudaha England iyo qaybo ka mid ah Wales

Barta internetka: www.nhs.uk

NHS Direct Wales

La mid ah NHS 111, laakiin loogu talagalay Wales.

Telefoonka: 0845 4647, ama wac 111 haddii laga helo deegaankaada

Barta internetka: www.nhsdirect.wales.nhs.uk

Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada Waqooyiga Ayrland (NHS Northern Ireland)

Macluumaadka internetka ee ku saabsan adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulshada Waqooyiga Ayrland.

Email: iyada oo loo marayo bogga xiriirka ee

Barta internetka: www.hscni.net

NI Direct

Macluumaadka Dawladda ee ku saabsan adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulshada Waqooyiga Ayrland.

Email: iyada oo loo marayo xiriirka bogga

Barta internetka: www.nidirect.gov.uk

Adeegyada turjumidda

Adeegyada turjumaadda waxay noqon karaan kuwo qaali ah. Haddii aad ka fekereyso inaad iibsato adeeg tarjumaan, weydii rugta takhtarkaaga, maamulka dowladdaada hoose, ama guddiga caafimaadka iyo daryeelka bulshada xaafaddaada ee Waqooyiga Ayrland. Waxaa laga yaabaa inay qabaan adeeg-bixiyayaal ay doorbidaan.

Tixraacyada

Tixraacyada lagu taageeray macluumaadkan waa la heli karaa markii laga soo codsado email: infofeedback@mndassociation.org

Ama warqad u dir:

Information feedback, MND Association, PO Box 246, Northampton NN1 2PR

Mahad-celin

Mahad-celin wayn ayaan u diraynaa dadkaan soo socdo maadaama ay macluumaadkaan nagu siiyeen talo qiimo leh:

Ruth Glew, Isu-duwaha Hoggaamiyaha Shabakadda MND, Isbitaalka Morrison,
Swansea, Wales

Lesley Johnston, Shaqaalka Talo-bixinta iyo Warfaafinta, Daryeellayaasha
Waqooyiga Ayrland

Macluumaad dheeraad ah

Waxaan bixinnaa xaashiyaal warbixineed iyo daabacado ku saabsan mawduucyo kala duwan.

Waxaad inta badan daabacaadyadeena ka soo dejisan kartaa boggeena internetka: **www.mndassociation.org/publications** ama Khadka caawinta MND Connect ka dalbo ayagoo daabacan. Kooxda khadka caawinta waxay ka jawaabi karaan su'aalaha ku saabsan macluumaadkeena, waxay ka hadli karaan baahidaada luqadeed, waxay kugu jiheyn karaan adeegyadeena iyo taageerooyinka kale. Haddii aysan ku hadlin luqaddaada, qof wakiil kuu ah ka codso inuu la soo xiriiro:



Barta internetka MND iyo madalka internetka

Barta internetka : **www.mndassociation.org**

Madalka internetka: **<http://forum.mndassociation.org>** ama ayadoo loo maraayo barta internetka

Goorta ugu dambeeyay ee dib loo eegay:	11/18
Dib u eegida xigta:	11/21
Nooca soo saarista:	1

Registered Charity No. 294354
Company Limited by Guarantee No. 2007023
© MND Association 2015